عفو و در گزر کی فضیلت

# Fadliga cafiska iyo dulqaadka

*(Iyo dardaaranka muhiim ah oo Madani xagiisa ahaaday)*



Shaykh-e-Tareeqat, Ameer-e-Ahl-e-Sunnat
Founder of Dawat-e-Islami, Allamah Maulana Abu Bilal
**MUHAMMAD ILYAS**
**Attar Qaadiri Razavi**

Translated into English by
Majlis-e-Tarajim (Dawat-e-Islami)

اَلۡحَمۡدُ لِلّٰهِ رَبِّ الۡعٰلَمِیۡنَ ؕ وَ الصَّلٰوةُ وَ السَّلَامُ عَلٰی خَاتَمِ النَّبِیّٖنَ ؕ
اَمَّا بَعۡدُ فَاَعُوۡذُ بِاللّٰهِ مِنَ الشَّیۡطٰنِ الرَّجِیۡمِ ؕ بِسۡمِ اللّٰهِ الرَّحۡمٰنِ الرَّحِیۡمِ ؕ

## Ducada Akhriska Buugta

Akhri ducadan soo socota ka hor inta aadan baran buug diini ah ama cashar Islaami ah, waxa aad xasuusan doontaa wax kaste oo aad baratid, اِنۡ شَآءَ اللّٰه عَزَّوَجَلَّ:

اَللّٰهُمَّ افْتَحْ عَلَيْنَا حِكْمَتَكَ وَانْشُرْ
عَلَيْنَا رَحْمَتَكَ يَا ذَاالْجَلَالِ وَالْاِكْرَام

Eebow عَزَّوَجَلَّ! Noo fur albaabka aqoonta iyo xikmadaha, oo noo naxariiso! Eebow adiga ayay sharaf iyo qadarin badan kuu sugnaatay! *(Al-Mustatraf, vol. 1, pp. 40)*

### Fiiro Gaar ah:

Akhri ka hor iyo kadib ducada salliga Nabigeena ﷺ hal mar.

عَفو و دَرگُزَر کی فَضِیلت

'Afw-o-Darguzar ki Fazeelat

# Fadliga cafiska iyo dulqaadka

*(Iyo dardaaranka muhiim ah oo Madani xagiisa ahaaday)*

Buuggan waxaa qoray Shaykhu-Tareeqa, Amiir-Ahlu-Sunnat, aasaasaha Dawat-Islami 'Allaamah Mawlaanaa Abuu Bilaal Muhammad Ilyaas Attaar Qaadiri Radawi دَامَتْ بَرَكَاتُهُمُ الْعَالِيَة oo ku qoran afka Urdu-ga. Golaha tarjumada (Waaxda Tarjumada) ayaa u tarjumay af Ingiriisi. Haddii aad ku aragto qalad tarjumaad ama qoraal, fadlan la xiriir Waaxda Tarjumada adiga oo u isticmaalaya cinwaanka boostada ama email-ka hoose, adiga oo niyadda ku haya ka helitaanka ajar (Sawab).

**Translation Department (Dawat-e-Islami)**

Aalami Madani Markaz, Faizan-e-Madinah, Mahallah Saudagran,
Purani Sabzi Mandi, Bab-ul-Madinah, Karachi, Pakistan
UAN: ☎ (+92-21-111-25-26-92 – Ext. 7213)
Email: 🖃 + translation@dawateislami.net

**ku sifaw cafis iyo dulqaaad**

Turjumaadda Ingiriisiga ee 'Afw-o-Darguzar ki Fazeelat'

◆

XUQUUQDA OO DHAN WAXA AY U ILAASHANTAHAY
Daabacaadda © 2024 Maktaba-tul-Madiinah

Qayb ka mid ah daabacaaddan lagama soo saari karo, ama lama gudbin karo, nooc kasta ama qaab kasta ha ahaato ee, sida elektaroonik, farsamo ahaan(mechanical), nuqul ka samaynta(copy-ahaan), duubista ama si kale, iyada oo aan oggolaansho qoraal laga helin Maktaba-tul-Madinah.

**Daabacaadda 2aad**: Jumaadil Saani, 1446 AH – (Dec, 2024)

**Tarjumaad:** Golaha-Tarjumaada (Dacwat-Islami)

**Daabacaha:** Maktaba-tul-Madiinah

**Tirada:** 3000

## KAFAALO-QAADID

Fadlan xor ayaa aad u tahay in aad nala soo xiriirto haddii aad rabto in aad kafaalo-qaado daabacaadda buug diini ah ama buug yar oo loogu talagalay Isal-e-Sawab oo aad ula baxayso xubnaha qoyskaaga dhintay ajar ahaan.

**Maktaba-tul-Madiinah**

Aalami Madani Markaz, Faizan-e-Madinah, Mahallah Saudagran, Purani Sabzi Mandi, Babul-Madinah, Karachi, Pakistan

✍ **Email:** maktabaglobal@dawateislami.net – maktaba@dawateislami.net

✆ **Phone:** +92-21-34921389-93

💻 **Web:** www.dawateislami.net



www.dawateislami.net

# Tusmada Buugga

**Fadliga Cafinta iyo Dulqaadka** ........................................ 1
Fadliga salliga Nabiga ﷺ........................................ 1
Sharafta waxaa kordhiya Cafiska ........................................ 4
Kuma ayaa Sharaf leh? ........................................ 4
Qofka aan wax cafin isna lama cafiyo ........................................ 4
Dabeecadaha Ugu Fiican ee Adduunka iyo Aakhiro ........................................ 5
Cafi adna waa lagu cafin doonaa ........................................ 5
Abaalmarinta cafiyaha waa cafis xisaab la'aan ah ........................................ 6
Wuu Cafiyey Qofkii Sixirka Ku Sameeyay ........................................ 8
Cafi 70 Jeer Maalin kasta........................................ 9
Dulqaadkii iyo cafiskii Al Hadrat Mohamed markii loo soo diray fariimo aflagaado ah ........................................ 10
Dardaaran Madani muhiim ah ........................................ 11
Qeybo Muhiim ah oo laga soo qaatay Fatawa Radawiyyah ........................................ 14
Midka beddelay aqoonsigiisa! ........................................ 15
Aflagaadadu waa xaraam ........................................ 16
Codsi Naxariis iyo dib ula-heshiinta kuwa ka baxay Dacwat-Islami ........................................ 18
Haddii Aadan Doonaynin In aad Ka Shaqeyso Dawat-Islaami maxaa xigi ........................................ 19
Eebow! Noo noqdo markhaati ........................................ 21
Ku dhawaaqida dagaal ka dhan ah isku-dirka ........................................ 22
Waa aan ka cafiyay Ilyaas Qaadiri ........................................ 25
Codsi Madani oo ku socota kuwa daynta bixiya ........................................ 26



www.dawateislami.net

Gabadhii aamusanayd waa ay hadashay..........................................26
Sii buugan qof kale kadib marka aad akhridid................................28
Madani Channel – Cabbirka Caalamiga ah ee Gudbinta..............29



www.dawateislami.net

اَلْحَمْدُ لِلّٰهِ رَبِّ الْعٰلَمِيْنَ وَ الصَّلٰوةُ وَ السَّلَامُ عَلٰى سَيِّدِ الْمُرْسَلِيْنَ
اَمَّا بَعْدُ فَاَعُوْذُ بِاللّٰهِ مِنَ الشَّيْطٰنِ الرَّجِيْمِ ط بِسْمِ اللّٰهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيْمِ ط

# Fadliga Cafinta iyo Dulqaadka

(Iyo Dardaaran Madani oo Muhiim ah)

Si kaste oo shaydaan isku dayo in uu kugu abuuro caajis, akhri buuggan si buuxda, hubaal waxa aad heli doontaa dareen sare oo ku saabsan fadliga cafiska, اِنْ شَآءَاللّٰه عَزَّوَجَلَّ.

## Fadliga salliga Nabiga ﷺ

Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم waxa uu yidhi, ‘Dadkaw! Shaki la’aan, qofka heli doona badbaado degdeg ah Maalinta Qiyaamaha dhibaatooyinkeeda iyo xisaabteeda waa qofka adduunyada igu salliyay tiro badan.’

*(Al-Firdaus bima Soor-il-Khitab, vol. 5, pp. 375, Hadees 8210)*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Cafiskata iyo Dulqaadka Rasuulkeena Suuban ﷺ

Sayyiduna Anas رَضِیَ اللّٰهُ عَنْهُ ayaa sheegay: Mar aniga oo dhinac soconaya rasuulkeena naxariista badan, u Shafeecaha Umadda صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم oo xirnaa shaal Najraani ah oo cidhifyo qaro weyn leh. Si lama filaan ah, nin Badawi ah (qof miyiga carabta



www.dawateislami.net

ka yimid) ayaa qabtay shaalkii/go'ii Nabiga waxa uuna u jiiday si xoog badan oo ka dhigtay in raad xagtin ah ku samaysmo qoorta barakaysan ee Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم. Markaas ayuu yidhi, 'Amar bixi in lay siiyo wax ka mid ah hantida Allah عَزَّوَجَلَّ ee uu ku siiyey.' Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ayaa xagiiisa u jeestay una dhoola cadeeyay, waxa uuna amray in la siiyo qayb ka mid ah xoolihii. *(Sahih Bukhari, vol. 2, pp. 359, Hadees 3149)*

*Her khata per mayri chashm-poshi*
*Her talab per 'ata`awn ki baarish*
*Mujh gunahgar per kis qadar hayn*
*Maharban Tajdar-e-Madinah*
*Gafafka oo la asturo, dalab kastana la aqbalo*
*Aqa ayaa xitaa noo naxariista, adoonka khaldan*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب     صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

Walaalaha Islaamka ahaw! Ma aragteen sida Rasuulkeenu صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ula dhaqmay ninka Badawiga-ah? Raacayaasha Mustafaheenaw! Ha joogsan, si kasta oo ay dadka kale kuugu jeesjeesaan ama u dhaawacaan dareenkaaga, kaliya cafi oo isku day in aad kula dhaqanto jacayl iyo dulqaad aad u wayn.

## Saddex Sababood oo xisaab fudud ku heli karto Aakhiro

Sayyiduna Abu Hurayrah رَضِىَ اللهُ عَنْهُ ayaa sheegay: Rasuulkeena



www.dawateislami.net

Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم wuxuu yidhi, 'Qof kasta oo saddexdan shay leh, Allah عَزَّوَجَلَّ wuxuu u fududayn doonaa xisaabta Maalinta Qiyaamaha, waxa uuna gelin doonaa Jannada (Naxariistiisa).' Markaas asxaabta رَضِیَ اللہ عَنۡھُم ayaa waydiiyey, 'Rasuulkii Allaw! Maxay yihiin waxyaabahaasi?' Wuxuu صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ku jawaabay:

1. Si wax kuwa adiga wax ku diida.

2. Samee xidhiidhin kuwa isku daya in ay xiriirkooda kaa jaraan; iyo

3. Cafi kuwa ku dulmiya.

*(Al-Mu'jam-ul-Awsat, vol. 4, pp. 18, Hadees 5064)*

## Qasri Jannada ku yaal

Sayyiduna Ubayya Binu Kacab رَضِیَ اللہ عَنۡهُ ayaa weriyey in Rasuulka Aadamaha, badbaadiyaha qalbiyadeenna iyo niyadeenna, kan ugu deeqsisan uguna naxarii sbadan aadamaha صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم uu yidhi, 'Qofkii doonaya in qasri looga dhiso (Jannada) iyo in darajooyinkiisa kor loo qaado waa in uu cafiyo midka dulmiga ku sameeya, wax siiya midka wax u diida, xidhiidhiya midka xidhiidhka u jara.'

*(Al-Mustadrak lil-Haakim, vol. 3, pp. 12, Hadees 3215)*



www.dawateislami.net

## Sharafta waxaa kordhiya Cafiska

Rasuulka Naxariista صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ayaa yidhi, 'Sadaqada (deeqdu) ma yareyso hantida, waxaana Allah عَزَّوَجَلَّ u kordhiya darajo qofka kuwa kale cafiya. Qofkii isu dhuldhiga (tawaaduca) Alle dartii عَزَّوَجَلَّ, waxaa Allah عَزَّوَجَلَّ ayaa kor u qaada.'

*(Sahih Muslim, pp. 1397, Hadees 2588)*

## Kuma ayaa Sharaf leh?

Sayyiduna Muusa Kaleemullah عَلَيْهِ السَّلَام wuxuu yidhi, 'Ilaahow عَزَّوَجَلَّ, ka ugu sharaf badan ee agtaada jooga waa kuma?' Allah عَزَّوَجَلَّ waxa uu ku jawaabay, 'Qofka cafiya isaga oo awood u leh in uu aargudan karo.'

*(Shu'ab-ul-Iman, vol. 6, pp. 319, Hadees 8327)*

## Qofka aan wax cafin isna lama cafiyo

Saxaabiga Sayyiduna Jariir رَضِیَ اللهُ عَنْهُ ayaa weriyey in Nabi Muxammad صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم uu yidhi, 'Qofkii aan dadka kale u naxariisan, looma naxariisan doono; qofka aan wax cafinin, lama cafin doono.'

*(Musnad Imam Ahmad, vol. 7, pp. 71, Hadees 19264)*



www.dawateislami.net

## Dabeecadaha Ugu Fiican ee Adduunka iyo Aakhiro

Sayyiduna cuqbah Binu Aamir رَضِیَ اللهُ عَنْهُ wuxuu sheegay in Sharaf u ahayd in uu la kulmay Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم, oo uu u degdegey qabashada gacantiisa barakaysan. Nabi Muxammad صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم isna si degdeg ah ayuu u qabtay gacantiisa waxa uuna ku yidhi, 'Uqbah! Dabeecadaha ugu fiican ee adduunka iyo aakhiro waa in aad xidhiidhiso kuwa xidhiidhka kaa goosta, iyo in aad cafiso kuwa ku dulmiya; qofkii doonaya cimri dheer iyo risqi barako leh waa in uu si wanaagsan ula dhaqmo qaraabadiisa.'

*(Al-Mustadrak lil-Haakim, vol. 5, pp. 224, Hadees 7367)*

## Cafi adna waa lagu cafin doonaa

Rasuulka aadamaha, badbaadiyaha qalbiyadeenna iyo niyadeenna, kan ugu deeqsisan uguna naxariista badan aadamaha صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ayaa yidhi, 'U naxariiso kuwa kale, si naxariis laguu siiyo, oo samee cafis, Allahna عَزَّوَجَلَّ waa uu ku cafin doonaa.'

*(Musnad Imam Ahmad, vol. 2, pp. 682, Hadees 7062)*

*Ham nay khata mayn na ki, tum nay 'ata mayn na ki*
*Koi kami Sarwara, tum pay karoron Durood*

*Rasuulkii Suubanaayaw! Si kaste oo dambiyadayadu u bataan;*
*wali, nagama aanad tagin,*
*kun salaamood korkaaga ha ahaadaan!*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب    صَلَّى اللهُ عَلٰى مُحَمَّد



www.dawateislami.net

## Abaalmarinta cafiyaha waa cafis xisaab la'aan ah

Sayyiduna Anas رَضِیَ اللّٰہُ عَنۡہُ wuxuu sheegay in Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم uu yidhi: Maalinta Qiyaamaha waxaa lagu dhawaaqi doonaa, 'Qof kasta oo abaalmarintiisu ay la jirto naxariista Alle, ha istaago oo ha galo Jannada.' Waxaa la weydiin doonaa, 'Kuma leh abaalmarintaas?' Qof dhawaaqay baa odhanaya, 'Kuwa wax cafiya.' Markaas kumannaan dad ah ayaa istaagi doona oo gelaya Jannada, iyaga oo aan wax xisaab ah lagu qabanaynin.

*(Al-Mu'jam-ul-Awsat, vol. 1, pp. 542, Hadees 1998)*

## Wuu Cafiyey Qofkii Isku Dayey In uu Dilo

Waxaa ku qoran bogagga 604 ilaa 605 ee "Seerat-al-Mustafa" [862-bog daabacadda Maktaba-tul-Madinah, qeybta daabacaadda ee Dacwat-Islam] in: Intii uu safar ku jiray, Rasuulka Naxariista صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ayaa uu seexday. Intii uu hurday, Qawras Binu Haaris ayaa soo qaaday seeftiisa oo galka ka bixiyey, isaga oo doonaya in uu dilo. Markii Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم soo toosay, Qawras ayaa ku yidhi, 'Muxammadow (صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم)! Yaa aad isku haleyn kartaa hadda oo ku badbaadin kara?' Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم waxa uu ugu jawaabay, 'Alle عَزَّوَجَلَّ.'

Ka dib waa argagaxay markii uu arkay weynida Nabinnimada, seeftii ayaa gacantiisa ka dhacday. Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ayaa seeftii gacantiisa barakaysan ku qabsaday kuna yidhi,

'Hadda yaa ku badbaadin kara adiga?' Qawras ayaa codsi ku baryay in uu badbaadiyo. Rasuulka Naxariista صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم wuu iska daayey oo cafiyey. Markii uu Qawras ku noqday qabiilkiisa, waxa uu dadkiisa u sheegay in uu ka imaaday qofka ugu wanaagsan aadanaha oo dhan.

*(Ash-Shifa, vol. 1, pp. 106)*

*Salam us per kay jis nay khoon kay piyasaun ko quba`ayn deen*
*Salam us per kay jis nay gaaliyan sun ker Du'a`ayn deen*
*Salaan korkiisa ha ahaato qofka cafiya, kuwa doonaya in ay dilaan*
*Salaan korkiisa ha ahaato ka u duceeya kuwii caayay*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب　　صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Waxa uu u Duceeyay In daalimiinta Alle ku soo hanuuniyo Islaamka

Dagaalkii Uxud, hal ilig oo ka mid ah ilkihii barakaysnaa ee Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ayaa laga jabiyay, wajigiisii barakaysnaana waa la dhaawacay. Hase yeeshee, Rasuulka Naxariista, Shafeeaha Umadda صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ma odhan wax ka badan: 'اَللّٰهُمَّ اهْدِ قَوْمِىْ فَاِنَّهُمْ لَا يَعْلَمُوْنَ' (Taas oo ah, Allehayow عَزَّوَجَلَّ qoomkayga hanuuni, waayo ima garanayaan aniga.)

*(Ash-Shifa, vol. 1, pp. 105)*

*Soya kiye naabkar banday*
*Roya kiyay zaar zaar Aqa*

*sharlaawayaashii waa ay seexdeen; halka uu Rasuulku ahaaday mid ilmaynaynaya.*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب     صَلَّى اللهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Wuu Cafiyey Qofkii Sixirka Ku Sameeyay

Labiid Binu Acsam ayaa ku sameeyay sixir Rasuulka xushmadda iyo caannimada u saaxiibka ah صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم, hase yeeshee Rasuulka Naxariista صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم kama aarsan. Sidoo kale, waxa uu صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم cafiyey haweeneydii Yuhuudiyadda ahayd ee sunta siisay.

*(Al-Mawahib-ul-Ladunniyyah lil-Qastalani, vol. 2, pp. 91)*

*Kyun mayri khata`on ki taraf daykh rahay ho*
*Jis ko hay mayri laaj who Lajpal bara hay*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب     صَلَّى اللهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Waynayida Rasuulkeena Barakaysan ﷺ

Hooyada Mu'miniinta, Sayyidatuna Caa'isha Siddiqah رَضِىَ اللهُ عَنْهَا ayaa sheegtay in Rasuulka Suuban صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم uusan ku hadli jirin ereyo xun oo ka baxsan caadada, ama ulajeedo kale leh. Waxa uu sidoo kale ka fogaan qaylada suuqyada, kumana jawaabi jirin fal xumaan ah xumaan kale. Isaga صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم uu iska cafiyi jiray una dulqaadan jiray.

*(Sunan-ut-Tirmizi, vol. 3, pp. 409, Hadees 2023)*



www.dawateislami.net

## Cafi 70 Jeer Maalin kasta

Qof ayaa yimid maxkamadda Rasuulka Sharafta iyo Barakada leh صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم waxa uuna si xishmad leh u weydiiyay, 'Ya Rasuulullaah صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم! Immisa jeer ayaa aanu cafinaa addoomadayada?' Rasuulka Sharafta leh صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم waa uu yar aamusay. Su'aashii ayaa uu kusoo celiyay, haddana Rasuulka Naxariista leh صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ayaa ka aamusay. Markii saddexaad uu su'aashii kusoo celiyay, markaas ayaa Rasuulka Sharafta leh صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم ku jawaabay, 'Todobaatan jeer maalintii.'

*(Sunan-ut-Tirmizi, vol. 3, pp. 381, Hadees 1956)*

Waxaa faahfaahiyay tafsiirka Qur'aanka ee caanka ah, Mufti Ahmad Yar Khan Na'eemi رَحْمَةُ اللّٰهِ عَلَيْه, isaga oo yidhi: Luuqadda Carabiga, lambarka 70 waxa uu adeegsaday dhawr jeer ama wax badan. Sidaas darteed, axaadiistaasi waxa ay ka dhigan tahay in ay marar badan cafiyaan maalintii.

Tani waxa ay khusaysaa marka addoomadu ay khaladaad sameeyaan si aan ula kac ahayn, ama khaladaadkooda ay waxyeeleeyaan hanti shaqsiyadeed oo uu leeyahay maamulaha. Laakiin khaladaadkooda maaha in ay cafiyaan marka ay dhacaan si ula kac ah, ama haddii khaladaadkoodu ay waxyeelo u geystaan Islaamka, hanti guud ama danta qaranka.

*(Mirat-ul-Manajih, vol. 5, pp. 170)*



www.dawateislami.net

## Dulqaadkii iyo cafiskii Al Hadrat Mohamed markii loo soo diray fariimo aflagaado ah

Haddii kaliya aan awoodmo in aan horumarino nafteena isla tirka xanaaqa nafteena sida ay sameeyeen dadkii wanaagsanaa ee hore. Waxa ay lahaayeen dareen ah in qof kasta oo dulmi kula dhaqma in ay isaga kula dhaqmaan naxariis iyo dabacsanaan. Odhaahdan waxa ay kusoo aroortay buugga *Hayat-e-A'la Hadrat* in: Mar warqado loo gudbiyey hoggaamiyaha, A'la Hadrat, Imaamka Ahl-us-Sunnah, Mawlaanaa, Ashah Imam Ahmad Raza Khan رَحْمَةُ اللّٰهِ عَلَيْه, waxana ku jiray warqado ay ka buuxdo aflagaado iyo ceebeyn. Kadib waxa cadhooday raacayaashiisi waxa ayna dooneen in ay dacwad maxkamadeed ka gudbiyaan dadka warqadahaas soo diray.

Imaamka Ahl-us-Sunnah, Maulana, Ashah Imam Ahmad Raza Khan رَحْمَةُ اللّٰهِ عَلَيْه wuxuu u sheegay in marka hore ay hadiyado u qeybiyaan kuwa u soo diray warqadaha amaanta ah, kadib markaasna ay dacwad ka gudbiyaan dadka qoray warqadahaas aflagaadada ah.

*(Hayat-e-A'la Hadrat, vol. 1, pp. 143; soo gaabiyey)*

Macnaha, haddii aanad abaal marin kuwa kuu amaanaya, maxaad u doonaysaa in aad ka aargoosho kuwa ku dulminaya?

*Ahmad Raza ka taazah gulistan hay aaj bhi*
*Khursheed-e-'ilm un ka darakhshan hay aaj bhi*



www.dawateislami.net

*Beerta Ahmad Raza weli waa mid barwaaqaysan;*
*Iftiinka aqoontiisa, ayaa si joogto ah u iftiimayaa.*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب     صَلَّى اللهُ عَلٰى مُحَمَّد
تُوْبُوْا اِلَى الله     اَسْتَغْفِرُ الله
صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب     صَلَّى اللهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Dardaaran Madani muhiim ah

Aniga oo hadda qoraalkan qoraya, waxa aan ku jiraa da'da lixdan sano. Geeridu si tartiib ah ayay u soo dhowaanaysaa. Yaa og goorta indhahaygu ay xidhmayaan si abid ah? Waxa aan ka baryayaa maxkamadda weyn ee Allah عَزَّوَجَلَّ, kan ugu Naxariista badan, ilaalinta iimaankeyga; nabad iyo degenaansho waqtiga geeriddayda, qabriga iyo Maalinta Qiyaame.

Waxa aan sidoo kale kaa baryayaa badbaado iyo xisaab la'aan Maalinta Qiyaame iyo in aan galo Jannatul-Firdawsa, heerka ugu sarreeya ee Jannada, ee la jaaritaanka Nabiga Sharafta leh صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم. Waxa aan arkay horumar iyo hoos u dhac badan nolosheyda gaaban; is muujin badan iyo daacad la'aan; is amaan badan iyo oofin la'aan.

Bal qiyaas, baaxadda khiyaamo ee qof sanmeeyo, isaga oo ka saara waalidkiis gurigiisa arrin yar awgeed, ama ficil nacayb ah, isaga oo hilmaamaya milyanada fadliga, samofalka iyo



www.dawateislami.net

naxariista waalidkiisa. Aah! Shaydaanka, la fogeeyay, ayaa ku ciyaaray qalbiyada iyo maskaxda dadka, laakiin alhamdulillah millions ka mid ah Muslimiinta ayaa ku biiray Dacwat-Islami.

Sida caadiga ah ururada waaweyn, dad ayaa ku biira kuwa kalana waa ka tagaan. Sidoo kale, waxa aan arkay qaar ka mid ah dadka oo aan ku qanacsanayn ka dibna waxa ay ka fogaadeen deegaanka Madani. Kadib, waxa soo baxday nidaam la'aan ka haysata joogtaynta dhaqamada Islaamka. Qaar ka mid ah walaalaha Islaamka ee aan ku qanacsanayn ayaa sidoo kale sameystay "koox" u gaar ah. Qaar ayaa wax ka sheegay aniga, qoraallo iga soo saaray, waxa ayna si weyn uga soo horjeesteen go'aanada golaha Markaz Majlis-al-Shuura ee Dacwat-Islami. Si kastaba ha ahaatee, alhamdulillah, ilaa hadda – waqtigan aan qoraalkan qorayo – Dacwat-Islami waxa ay sii wadaysaa horumarka waxana ilaa hadda aan jirin "koox" la siman Dacwat-Islami, waa ay ka hooseeyaanba.

Waxa aan qayb wayn oo ka mid ah nolosheyda ka shaqeeyey hawsha ururka(mutadawacnimo), sidaas awgeed, iyada oo aan tixraacayo khibradayda, waxa aan halkan ku soo bandhigayaa dardaarankayga dhammaan walaalaha muslimka ah, ujeedkayga u wayni waa horumarinta Madani:

"Fadlan hal shay xusuusnow oo si adag u qabso, hadda oo aan noolahay iyo marka aan geeriyoodee, marka aad ku biirtaan Dacwat-Islami, adiga oo ku adkaysanaya aqoonsiga Dacwat-Islami (tusaale ahaan, cumaamadda cagaaran iwm), ha bilaabin



www.dawateislami.net

‘koox’ cusub oo ka fog manhajka Dacwat-Islami. In kasta oo, haddii aad bilowdo waxqabadyo dheeri ah si aad u kobciso shaqada diinta, waxa ay noqon doontaa mid aad u adag in aad naftaada ilaaliso xanta, hadalka xun, dacaayado xun oo dadka kaaga timaada, niyad jab iyo dadka qaar oo cadaw kugu noqda, iyo waxyaabo kale oo xun. Waxa suurtagal ah in Muslimiin badan oo kale ay ku dhacaan dembiyadaa waaweyn."

Haddii qof uu doono in uu sameeyo u adeegid aad u weyn oo uu diinta u qabto isaga oo gooni ka noqonaya Dacwat-Islaami oo uu samaysto koox gaar ah. Waxa aan jeclaan lahaa in aan tusoo xaqiiiqada, goosashadaasi ma waxa ay tahay mid wadata isku-dir iyo falal xun oo kale, ama dembiyo kale oo waaweyn oo noocaas ah? Haddii maya ay tahay, kun hambalyo ayaa aan u dirayaa. Haddii se ay ku dhex milmeen Dembiyadaasi waa in uu is weydiiyo in Shaqadiisa diineed ee Mustxabka ah ay xambaarsan tahay arrin ka miisaan weyn oo ah cayda iyo dembiyada kale ee la galayo, Ma samaynaysaan shaqadan diineed? Haddii qalbi Allaah ka cabsada leeyahay, qofkaasina yahay mid lagu manaystay aqoonta diinta iyo damiir nool markaas jawaabtiisu waxa ay noqon doontaa; Haa. Hal eray oo xan ama isku-dir oo lagu dhawaaqo ayaa ka miisaan waynaan kara dhammaan ficilladii Mustxaabka ahaa ee uu noloshiisa soo qabtay, maadaama aysan jirin wax digniin ah oo ku saabsan ciqaabta lagu waayi karo camalka Mustxabka ah, balse xantu waxa ay qofka ka dhigtaa mid gala cadaab ah.



www.dawateislami.net

Sidaa darteed, waxa lagu soo gabagabeyn karaa in la sameeyo Kooxd gooni kadib markii lagu soo biiray Dacwat-Islami, waa aad xad gudubtay waxana aad waayi doontaa faa'idooyinkii aad ku qabtay Dacwat-Islaami, ha ahaato in lagaa saaro adiga ama in aad adigu kaligaa iskaga baxdo.

## Qeybo Muhiim ah oo laga soo qaatay Fatawa Radawiyyah

Marka la eego xaaladda dhabta ah, waxaa fiican in la iska dhaafo hawsha diinta ee aan Fard, Wajib ama Sunnah-mu'akkadah ahayn, haddii ay keenayso xumaan ka dhex dhacda Muslimiinta dhexdooda, xitaa haddii ay tahay Afdal [اَفْضَل] iyo Mustaxab.

Si loo gaadho wacy/baraad ku saabsan muhiimadda midnimada Muslimiinta, meel ka mid ah ayaa waxa uu idhi Al Hadrat, Imaam Ahmad Raza Khan رَحْمَةُ اللّٰهِ عَلَيْه: Si loo raalli geliyo qalbiyada dadka sidoo kale loo mideeyo Muslimiinta, waa la oggol yahay in la iska dhaafo fal wanaagsan si dadka aysan u dareemin xumaan. Sida Nabiiga Naxariista leh صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم uu u ilaaliyay dhismaha Ka'bah, isaga oo ka dhigay mid ku saleysan aasaaskii dadka Quraysh, si dadka cusub ee Islaam soo galaya aysan ula kulmin fikrado qalad ah.

*(Fatawa Razawiyyah – Tixraac, vol. 7, pp. 680)*



www.dawateislami.net

Sidoo kale, waxa uu amray in la iska dhaafo fal Mustaxab ah hadii uu keeenayo xumaan Muslimiinta dhexdooda. Al Hadrat [Imaam Ahmad Raza Khan رَحْمَةُ اللّٰهِ عَلَيْه] waxa uu sheegay tiir kamida tiirarka Madani si loo dhiso jacayl iyo isku xidhnaan Muslimiinta dhexdooda: Qiimee nacaybka dadka ka hor inta aanad samayn fal Mustaxab ah. Ka fogaw in aad sababto khilaaf iyo isqabsi [Fitnah], dhibaataynta dadka kale, kicinta murugo, xasad iyo cadaawad. [Xeerkan ma khusaynayo in la iska dhaafo fal Faral ah, Waajib iyo Sunnah, haddii ay muhiim yihiin iyo hadii kalaba]. *(Fatawa Razawiyyah – Tixraac, vol. 4, pp. 528)*

Sidoo kale, Al Hadrat [Imaam Ahmad Raza Khan رَحْمَةُ اللّٰهِ عَلَيْه] waxa uu sheegay isaga oo sharxaya mid ka mid ah xeerarka fiqiga Islaamka: 'دَرْءُ الْمَفَاسِدِ اَهَمُّ مِنْ جَلْبِ الْمَصَالِحِ' i.e. ka hortagga xumaanta ayaa ka muhiimsan helitaanka wanaagyo.

*(Fatawa Razawiyyah – Tixraac, vol. 9, pp. 551)*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب　　صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Midka beddelay aqoonsigiisa!

Kuwa kale ee ka goostay aqoonsiga Dacwat-Islami [cimaadda cagaarka ah iwm] ee aan si sharci ah uga soo horjeedin Dacwat-Islami, isla markaana sii wada u adeegida diinta iyaga oo aan ku dhexgalin aflagaado, islu dir, xan, malayn xun, Alle عَزَّوَجَلَّ ha ka aqbalo dadaalkooda wanaagsan.



www.dawateislami.net

Dhanka kale, kuwa go'aansaday in ay iska dhaafaan aqoonsiga Dacwat-Islami ee samaystay kooxo u gooni ah, kana soo horjeeda Dacwat-Islami, iyaga oo aan wax sabab sharci ah jirin, waxa ay isku dayayaan in ay daciifiyaan dhaqdhaqaaqa Madani ee faafinta dacwada si wanaagsan. Hubka ay isticmaalaan waa isku dir, xan, aflagaado, eedayn been ah, samaynta ceebayn, been abuurasho, sheegashooyin taban iyo kutiri kuteen, waxayna u arkaan inay tahay u adeegid diineed. Waa in ay ka fiirsadaan oo ay xakameeyaan nafahooda. Tani ma aha u adeegid diineed balse waa falal kaliya buuxinaya buugga damiyadooda.

Sidoo kale, qof kasta oo mucaarada Dacwat-Islami haba ahaado mid haysta aqoonsiga Dacwat-Islami, isaga oo aan haysan sabab sharci ah, sidoo kale abuuraya nacayb qalbiyada Muslimiinta dhexdooda, iskuna dayaya in uu xumeeyo sumcadda iyo hab-dhaqanka Dacwat-Islami; waxa uu qaadi doono mas'uuliyada la xisaabin doonaa inuu galay falka aan la oggolayn.

## Aflagaadadu waa xaraam

Waxaa badanaa la arkaa in haddii qof uu qof kale ka soo horjeedo, uu si aan macno lahayn u dhaleeceeyo, isku dayo in uu ka hadlo dhinacyadiisa xunxun iyo galdalooladiisa, (inyar oo Ilaahay dhawray mooyee). Markii ay xidhiidh wanaagsan lahaayeen, waxa uu ahaa sidii uu dhididka qofku u urayo

udgoon, balse hadda ka dib markuu khilaaf dhaco, xitaa urta cadar-kiisa ayaa six un ula uraysa.

Xusuusnow! In la shaaciyo khaladaadka iyo ceebaha daaci kasta, gaar ahaan Culumada Sunniga ah, adiga oo aan haysan sabab sharci ah, ama in laga faaafiyo dacaayado khaldan, waa wax aad u daran oo dhaawac u geysanaya faafinta dacwada Islaamka iyo wacdiga wanaagsan, sidoo kale waxa ay sababtaa ciqaab Aakhiro.

Aqoonyahan Hadrat, Imaam Ahlu-Sunnah, Mawlaanaa, AShah Imam Ahmad Rida Khan رَحْمَةُ اللّٰهِ عَلَيْه ayaa sheegay buugga Fatawa Radawiyyah, cutubka 29, bogga 594: “Haddii uu qof muslim sunni ah ku khaldamo, markaas waxa waajib ah in la qariyo, haddii kale dadka, Ilaah عَزَّوَجَلَّ ha ka reebo, way fogayn doonaan isaga, waxayna jiri I ay Meesha ka baxdo wax kaste oo laga faa'idi lahaa khudbadihiisa iyo qoraalladiisa ee ku saabsan adeegga Islaamka iyo Sunnada.”

In la faafiyo khaladaadka iyo ceebaha qofka si muuqata waxa lagu tirinayaa been abuurasho iyo xumaan waana xaraam. Allah عَزَّوَجَلَّ wuxuu sheegay Qur'aanka Kariimka ah:

اِنَّ الَّذِيْنَ يُحِبُّوْنَ اَنْ تَشِيْعَ الْفَاحِشَةُ

فِى الَّذِيْنَ اٰمَنُوْا لَهُمْ عَذَابٌ اَلِيْمٌ ۙ فِى الدُّنْيَا وَالْاٰخِرَةِ ؕ



www.dawateislami.net

*"Hubaal kuwa jecel in ay ka faafiyaan xumaan dadka mu'miniinta ah, waxa u sugnaaday ciqaab adag adduunka iyo aakhirahaba."*

*[Kanz-ul-Iman (Tarjumaadda Qur'aanka)] (Qeybta 18, Surah An-Noor, Aayada 19)*

## Codsi Naxariis iyo dib ula-heshiinta kuwa ka baxay Dacwat-Islami

Illaa iyo hadda, qof kasta oo raali ka ahayn ama ka xumaaday aniga ama golaha shuurada, oo ka baxay Dacwat-Islami, iyo qof kasta oo la dhibaateeyay, ama xaq uu lahaa wayay aniga dartay, waxa aan si qalbi furan uga raaligelinayaa. Labadayda wiil, Gudoonka-Shuurada iyo xubnaha Golaha-Shuurada, sidoo kale iyaguna raaligelin bay bixinayaan. Waxa aan si xushmad leh idiin kaga codsanayaa in aad I cafisaan, oo na wada cafisaan, magaca Allah عَزَّوَجَلَّ iyo Rasuulkiisa Nabi Muxammad (صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم) darteed. Ujeeddada aan isku cafinayno waa in Allah عَزَّوَجَلَّ iyo Rasuulkiisa (صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم) raali galino, waxa sidoo kale cafinaynaa si muuqata dhammaan kuwa ku xadgudbay xaqeena.

Intaas waxaa sii dheer, waxa aan si qalbi furan ugu martiqaadayaa dhammaan dadka sameeyay kooxo iyo ururo u gaar ah, ha ahaadaan qaar aan ka raali ahayn shakhsiyaad ama tabanaya khilaaf kale wada xaajood iyo heshiis magaca Allah عَزَّوَجَلَّ iyo Rasuulkiisa (صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم) darteed. Si qalbi furnaan ah oo raali ahaanshaha Allaah عَزَّوَجَلَّ ah, waxa aan diyaar u ahay



www.dawateislami.net

heshiis, xataa shuruud la'aan ah, qof kasta oo Muslim ah oo raali iga ahayn. Kuwa kale ee doonaya in ay xal u helaan khilaafyo arrimaha ururka iyada oo loo marayo wada-hadal, albaabadeenu waa u furan yihiin. Fadlan la xidhiidh sida ugu dhakhsaha badan, oo samee qorshe si aad ula fadhiisataan oo aad ula hadashaan Golaha-Shuurad. Haddii aad amartaan, waxa aan sidoo kale diyaar u ahay in aan imaado aniga iyo Shuuradu. Imow, oo nagu soo biir! Si aan u midawno oo fadliga Allah عَزَّوَجَلَّ iyo fadliga Nabigeena Muxammad (صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم), اِنۡ شَـآءَاللّٰه عَزَّوَجَلَّ, aan si wadajir ah uga shaqayno adeegyada Madani ee diinteenna, iyo in aan ka hortagno qorshayaasha xun ee Shaydaanka.

## Haddii Aadan Doonaynin In aad Ka Shaqeyso Dawat-Islaami maxaa xigi

Haddii uu jiro walaal Muslim ah oo aan raali ka ahayn in uu ka qayb qaato hawlaha Madani ee ay qabato Dacwat-Islami, waa in uu ugu yaraan iska iloobo xumaan hadii ay dhacday oo uu naga cafiyo, isla markaana uu na ogeysiiyo si uu ugu muteysto abaalmarin ah ka raali ahaanshahaa walaalkaa Muslimka ah. Sidaas awgeed, اِنۡ شَـآءَاللّٰه عَزَّوَجَلَّ, waxa inoo suurta galaysa in aynu Meesha ka saarno xumaanta, kala fogaanshaha, dullaysanka Shaydaanka, qofka wax cafiyayna wuxuu noqon doonaa mid ay ka ifayso (farxad).

Mar kale, waxa aan kaa codsanayaa in aad na cafiso, erayada Rasuulka Naxariista (صَلَّى اللّٰهُ عَلَيۡهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم) u uku hadlay darted, sida xadiiskan ku xusan "Qof kasta oo raali gelin ka codsada walaalkiisa Muslimka ah, ee diida in uu ka aqbalo cafiskaas [iyada oo aan sabab Sharci ahi jirin] ma heli doono barakada in uu tago Xawd-Al-Kawsar." *(Al-Mu'jam-ul-Awsat, vol. 4, pp. 376, Hadees 6295)*

Sidoo Kale Xusuuso, in ay tahay wax aan wanaagsanayn in la Yidhaahdo: [Amiirka-Ahlu-Sunnah] Muhammad Ilyas 'Attar Qaadiri Radawi waa in uu isagu yimaado oo uu nala kulmo; haddii uusan iman karin, waa in uu noo soo diro gudoonka sare ee Shurada, ama ugu yaraan xubin ka tirsan golaha Shuurada si uu noogu yimaado ama si uu ugu yimaado hogaamiyahayaga. Kuwa arimaha noocaas ah wdawada waxa ay keeni karaan shaki ah in ay isku dayayaan in ay dib u dhigaan wada xaajoodka iyo in la wada heshiiyo. Markii aan tallaabadii ugu horreysay qaadnay ee wada-xaajoodka, anaga oo qornay cudur-daarkaas, ma jiraan wax caqabado ah oo ku hadhay dadka qalbiyada saafigaa leh. Walaal kasta oo Muslim ah oo ka xun waa in uu talaabo qaadaa oo isu soo celiyaa, isaga oo ku doonaya raali ahaanshaha Allah عَزَّوَجَلَّ. Haddii aadan doonaynin in aad noo timado oo nala kulanto, ugu yaraan la xidhiidh xubin ka tirsan Markaska golaha Shuurada telefoon ahaan.

*Allah karay dil mayn utar jaye mayri baat*

*"Hadalkaygu waxa uu meel ku yeesha qalbiga; Ilaahayaw* عَزَّوَجَلَّ *ka dhig sidaas."*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Eebow! Noo noqdo markhaati

Eebow عَزَّوَجَلَّ! Ii noqo markhaati in aan u bandhigay si muuqata dib-ula-heshiisiinta walaalaha Islaamka ee aan isku cadhaysannay. Eebow عَزَّوَجَلَّ, naxariis ka yeel qalbigooda, si ay ii siiyaan cafis oo ay dib-iigala-heshiiyaan khilaafaadkooga. Eebow عَزَّوَجَلَّ! Waa aad ogtahay xaaladda qalbigayga, ujeeddada keliya ee aan ka leeyahay dib-u-heshiisiintan waa hagaajinta Aakhiradayda. Kahor geeridayda, waxa aan rabaa in aan isku keeno dhammaan Muslimiinta walaalaha ah eek la cadhaysan si aan u heshiisiiyo, kali; si aan u helo raali ahaanshahaaga. Eebow عَزَّوَجَلَّ! Waxa aan ka baqayaa xukunkaaga qarsoon ee yaa Allah; عَزَّوَجَلَّ, fadlan ha ii cadhoodh waligaa.

Eebow عَزَّوَجَلَّ! Waxa aan kaa baryayaa in aad iiga ilaaliso in Iimaankeygu lumo, xataa inyar oo ka mid ah. Eebow عَزَّوَجَلَّ! Ii dambi dhaaf, adiga aan ii eegin xisaabtaada, iyo dhammaan walaalaha Islaamka ee aan ku faraxsanayn iyo kuwa aan ku xidhnayn Dacwat-Islami. Eebow عَزَّوَجَلَّ! Eebeow, cafi Ummadda Muslimiinta oo dhan, dhamaantood Rasuulkaaga qaali ah صَلَّى اللّٰهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم dartii. Eebow عَزَّوَجَلَّ! Na mide. Fadlan na



www.dawateislami.net

siiawood aan ugu adeegno Diinteena si wadajir ah, daacadnimo iyo niyad sami.

اٰمِيْن بِجَاهِ النَّبِيِّ الْاَمِيْن صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَاٰلِهٖ وَسَلَّم

*Sunnatayn 'aam karayn Deen ka ham kaam karayn*
*Nayk ho jayain Musalman Madinay walay*

*Nabi (SCW)! Waxaan ku faafinaynaa habka Sunnaha*
*Xaqa helna, waxaana dhaqan gelinaynaa astaamaha Islaamka.*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب    صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

تُوْبُوْا اِلَى اللّٰه    اَسْتَغْفِرُ اللّٰه

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب    صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Ku dhawaaqida dagaal ka dhan ah isku-dirka

Wa aan kaxumay! waa ay fogaysteen "isku-dirka" Muslimiintu intooda badani. Iyada oo isku-dirka  Shaydaanku dadka ugu jiido xagga naarta si degdeg ah. Iska jir! Lana gal dagaal ka dhan ah isku-dirka oo ka gaashaamo. Kuwa isku-dirka sameeyay waa in ay tawbad keenaan oo ku ku mashquulaan raali gelinta Alle. Qaata go'aan adag: 'Anigu waxna isku diri maayo, mana dhegeysan doono, اِنْ شَآءَاللّٰه عَزَّوَجَلَّ (haddii Alle idmo)!'



www.dawateislami.net

Wa aan kaxumay! isku-dirku waxa uu burburinayaa deegaanka Madani ee aan leenahay, sida ay xayawaanku u burburiyaan alwaaxda. Sidaas darteed, waxa aan ka codsanayaa dhammaan walaalaha Muslimiinta ah in ay ku shaqeeyaan dagaalkan ka dhanka ak isku-dirka, isla markaana xidhista dhammaan albaabada isku-dirka ku keeni kara.

Kuwa ka baxay deegaanka Madani ee muddada mas'uuliyadooda, fadlan isku day in aad xasuusato 112 jeer haddii ay kugu isku dir kugu sameeyaan, ama adigu isku-dir aad ku samayso iyaga, taasoo keentay in ay ka niyad jabeen oo ka tageen deegaanka Madani. Haddii midkood oo ka mid ah xaaladahaas ay dhacdo, markaas qalbigaaga wanaaji oo doon raali ahaanshaha Allah عَزَّوَجَلَّ, isla markiiba u bari oo cafis waysiido, waxana wanaagsan in aad ilmaynayso adiga oo ka murugoonaya wixii aad samaysay.

Ha weydiisan in ay kuu yimaadaan, balse adigu waa in aad utagtaa, adiga oo raadinayaa qof kasta oo ka baxay Dacwat-Islami arintaa darteed, u tag, u bari si xushmad leh si aad ugu soo celiso deegaanka Madani ee Dacwat-Islami,siina wad dadaalkaaga oo samee marar kale si aad u fidiso Sunnada (Kuwa aan mas’uuliyad rasmi ah ka hayn Dacwat-Islami, waxa ay sidoo kale ka qeyb qaadan karaan dadaalkan wanaagsan, balse ha u dhawaan dadka si rasmi ah looga mamnuucay Dacwat-Islami. Kiiskooda, raac go’aannada mas’uuliyiinta sare ee Dacwat-Islami).



www.dawateislami.net

*Ay khasa-e-khasaan-e-Rusul waqt-e-Du'a hay*
*Ummat pay tayri aa kay 'ajab waqt para hay*

*Chhotaun mayn ita'at hay na shafqat hay baraun mayn*
*Piyaraun mayn mahabbat hay na yaraun mayn wafa hay*

*Jo kuch hayn woh sab apnay hi hathaun kay hayn kertoot*
*Shikwah hay zamanay ka na qismat ka gilah hay*

*Daykhay hayn yeh din apni hi ghaflat ki badawlat*
*Sach hay kay buray kaam ka anjam bura hay*

*Ham nayk hayn ya bad phir aakhir hayn tumharay*
*Nisbat bahut achchhi hay ager haal bura hay*

*Tadbeer sanbhalnay ki hamaray nahin koi*
*Han aik Du'a tayri kay maqbool-e-Khuda hay*

*Nabigii saamayntaa badnaayaw, Waxa la gaadhay Wakhti ummadaadu dhex muquuratay fitnooyinka iyo dhibaatooyinka,*

*Dhallinyarada ixtiraam ma leh; dadkii waaweynnad dulqaad ma leh, Saaxiibadii ma leh daacadnimo; jacaylkiina ma laha xidhiidhin,*

*Tan ayaa timaadday, sababtuna waa falalkayaga khaldan, Ma jirto eed wakhtiga ama qaddarka ah, wax kaste waxa aanu ku kasbanay dhibaatooyinkayaga,*



www.dawateislami.net

*Ha ahaado mid Alle la cabsi le amd mid aqan lahayn, waxa aan leenahay Isku xidhnaan wanaagsan, basle xaaladayadu waa liidata,*

*Wax noo maqan ma jiro, aan ahayn ku tiirsanaanta ducadaada, Runtii, ducadaadu waa aqbal, kala reebid lahayn.*

## Waa aan ka cafiyay Ilyaas Qaadiri

Si xushmad leh, gacmahayga oo isku laaban, waxa aan si naxariis leh uga codsanayaa dhammaan walaalaha Islaamka ah in ay iga cafiyaan aniga, carruurteyda, Nigran(eray bixin loo yaqaaan madaxda uruka) iyo xubnaha Shuurada, haddii midkeen uu idiin xantay, idiin dhaleeceeyay, idiin aflagaadeeyay ama idiin xumeeyay si kasta oo ay tahay. Wixii xuquuqo yaryar ama waaweyn ee lagu tilmaami karo nolol, hanti, qoys, iyo sharaf hadii ay jirto, kasoo qaad in aniga, carruurteyda, Nigran-ka iyo xubnaha Shuurada kugu xadgudubnay. Sidaa darted fadlan, fadlan nagu cafi dhammaanteen oo ku hel ajar iyo abaal marin.

Gacmahayga oo isku laaban, waxa aan si xushmad leh uga codsanayaa oo aan u bandhigayaa codsigeeyga Madani in si qalbi ah u yidhaahdaan ugu yaraan mar kaliya, Alle dartii عَزَّوَجَلَّ, waxa aan a cafiyay Ilyaas Qaadiri Radawi, carruurtiisa, Nigran-ka iyo xubnaha Shuurada. Waxa aan sidoo kale ka cafiyay dhammaan kuwa ku xadgudbay xuquuqdayada yaryar iyo waaweynba Alle dartii عَزَّوَجَلَّ.

## Codsi Madani oo ku socota kuwa daynta bixiya

Haddii aad qof ku leedahay deyn ama aad wax amaahisay qof wakhti kooban, isla markaana aanu kuu soo celin, fadlan la xidhiidh Nigran-Shuura ee Dacwat-Islaami. Haddii aadan doonayn in aad soo ceshato, fadlan, doonista raali ahaansha Allah عَزَّوَجَلَّ awgeed iskaga cafi, waxaana ku heli doontaa abaalmarin weyn Aakhiro. Haddii qof aan ku leeyahay lacag, waxa aan halkan ku cadeynaya in aan cafiyay dhammaan deynteyda shaqsiga ah. yaa Allah عَزَّوَجَلَّ:

*Tu bay-hisab bakhsh kay hayn bay-hisab jurm*
*Dayta hoon wasitah Tujhay Shah-e-Hijaz ka*

*Bixi cafiska adiga oo aan marin maxkamad mar hadlii liiska dambiyadu badanyay*
*Waxa aan ka raadinayaa dambi dhaaf Boqorka Makkah iyo Madinah.*

صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب　　صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد
تُوْبُوْا اِلَى اللّٰه　　اَسْتَغْفِرُ اللّٰه
صَلُّوْا عَلَى الْحَبِيْب　　صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Gabadhii aamusanayd waa ay hadashay

Walaalaha Islaamka ahow! Si aad uga baxdo caadada in aad ka qeyb gasho ama aad dhageysato xanta, oo aad u yeelato



www.dawateislami.net

caadada tukashada iyo ku dhaqanka Sunnada, ku xidh naftaada deegaanka wanaagsan Madani ee Dacwadda Islaamka saxda ah. Ka qayb gal kulanka usbuuclaha ah ee la iskugu dhiirigeliya Sunnada si joogto ah, sidoo kale raac safarada dacawiga ah adoo la jaal noqonaya raacayaasha Rasuulka ee Madani, si aad u barato Sunnada iyo si aad ugu liibaanto nolosha aduunyo iyo mida Aakhiro. Buuxi foomka su'aalaha ee fikirka Madinah oo u gudbi Zimmahdar (walaalka mas'uulka ah) ee Dacwat-Islami maalinta ugu horeysa ee bisha Madani. Si aad ugu qanacdaan in aad kasoo qayb gashaan kulanka Sunnada ee toddobaadlaha ah, aan kuu soo bandhigo tusaale Madani oo dhiirigelin leh:

Si lama filaan ah, gabadh Islaam ah oo kasoo jeedo tuulo ku taalla degmada Khushab (Pakistan) ayaa aamustay oo lumisay hadalkii. Dhakhtarada deegaanka ayaa ku guuldareysatay daawaynteeda, markaas ayaa loo qaaday Baabul-Madiinah, Karachi (Pakistan). Daaweynta halkan (Karachi) sidoo kale wax saameyn ah ma yeelan.

Lix bilood ayay ku sugnayd xaaladdan. Kadib, waxay fursad u heshay in ay ka qayb gasho kulanka toddobaadlaha ee lahu dhiirrigeliya Sunnada ee ay qabanqaabiso Dacwat-Islami, oo ah dhaqdhaqaaq calami ah oo aan siyaasi ahayn kana shaqeeya Qur'aanka iyo Sunnada. kulankaas, gabadh muslimad ah, iyada oo dadaal shakhsiyadeed oo badan ku bixisay, ayaa ay ku qancisay in ay ka qayb gasho laba iyo toban kulan oo isku xigxiga. Intii ay ka qayb galaysay kulamadii si isku xigxigta, 8-dii Ramadaan 1430 AH, waxa uu ahaa kulankeedii lixaad.

Dhammaadkii kulanka markii la akhrinayay Salliga Nabiga, اَلۡحَمۡدُ لِلّٰه عَزَّوَجَلَّ, gabadhii aan hadli jirin ayaa si lama filaan ah u hadashay!

*Hadrat-e-Shabbir-o-Shabbar kay tufayl*

*Taal her aafat ay Nana-e-Husayn*

*Anoo ku hadlaya afka awoowyaasheen, Allahayaw ka fogee masiibooyinka iyo xanuunka awoowgii Husayn*

صَلُّوۡا عَلَى الۡحَبِيۡب صَلَّى اللّٰهُ عَلٰى مُحَمَّد

## Sii buugan qof kale kadib marka aad akhridid

Sii buuggan qof kale marka aad akhrido, hel ajar oo qaybi buugaagta daabacan ee Maktabatul-Madiinah iyo buugaagta Madani ee online-ka ah (pdf) munaasabadaha arooska, janaasada, kulamada, maherka, maalinta dhalashada Nabiga iyo wixii la mid ah. Ka dhig caado in aad buugaagta qaar ku hayso dukaankaaga ama xafiiskaaga si aad u siiso macaamiishaada ama saaxiibadaada shaqada adiga oo uga jeeda helida ajar. U dir ugu yaraan hal buug oo dhiirigelinta Sunnada ah ama buugta Madani ee online-ka ah guri kasta oo xaafaddaada ku yaal adiga oo kaashanaya caruurta ama iibiyaasha buugaagta, si aad kor ugu qaaddo dadaalada ku aaddan faafinta dacwadda xaqa ah iyo helista ajar weyn.

Luminayda weyn ee ruuxiga ah iyo cilmiga ah ee qarniga 21aad, ‘Allamah Maulana Abu Bilal Muhammad Ilyas Attar Qaadiri Razavi دَامَتۡ بَرَكَاتُهُمُ الۡعَالِيَة ayaa aasaasay Dawat-e-Islami

(dhaqdhaqaaqa caalami ah ee aan siyaasadda lahayn ee baridda Qur’aanka iyo Sunnada) kaas oo faafinaya waxbarashada Islaamka ee in ka badan 100 dhinac oo nolosha ah. Haddii aad rabto inaad wax ka ogaato Aasaasaha Dawat-e-Islami, buugaagtiisa, buugaagtii yaryad, iyo waaxaha kala duwan ee Dawat-e-Islami, markaa booqo website-kan: www.dawateislami.net.

Sidoo kale, Dawat-e-Islami waxay faafinaysaa fariinta Islaamka adduunka oo dhan iyada oo loo marayo Madani Channel, kanaal 100% Islaam ah. Meel kasta oo aad joogto adduunka, haddii aad xiisaynayso inaad daawato Madani Channel, raac faahfaahinta soo socota. Haddii aad rabto inaad nala soo xiriirto, email naga soo dir: overseas@dawateislami.net

## Madani Channel – Cabbirka Caalamiga ah ee Gudbinta

Gudbinta: Dijitaal

| Satellite | Beam Type | Position | Downlink | Hz. | Polarity | Sym. Rate | FEC |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Asiasat (A7-C3V) | Global | 105.5 E | C-Band | 3739 | Vertical | 2815 | 3/4 |
| Intelsat 20 | Africa Region | 68.5 E | KU-Band | 12562 | Horizontal | 26657 | 2/3 |
| Eutelsat 7 | Middle East | 7 West A | KU-Band | 10815 | Horizontal | 27500 | 5/6 |
| Astra 2F | Europe | 28.5 E | Sky Platform | 12640 | Vertical | 22000 | 5/6 |
| Galaxy 19 | USA | 97 West | KU-Band | 121835 | Horizontal | 22000 | 3/4 |

الحمد لله رب العلمين والصلوة والسلام على سيد المرسلين اما بعد فاعوذ بالله من الشيطن الرجيم بسم الله الرحمن الرحيم

# FOR BECOMING A PIOUS AND SALAH-OFFERING MUSLIM

Spend the whole night in the weekly Sunnah-inspiring Ijtima' of Dawat-e-Islami held every Thursday after Salat-ul-Maghrib in your city, for the pleasure of Allah عزوجل with good intentions. In order to learn Sunnahs, make it your routine to travel with a 3-day Madani Qafilah every month with the devotees of Rasool, to fill out the Madani In'amat booklet every day practising Fikr-e-Madinah and to submit it to the relevant responsible Islamic brother of your locality on the first date of every Madani month.

**My Madani Aim:** 'I must strive to reform myself and people of the entire world, ان شاء الله عزوجل.' In order to reform ourselves, we must act upon Madani In'amat and to strive to reform people of the entire world, we must travel with Madani Qafilahs, ان شاء الله عزوجل












ISBN 978-969-631-896-5
0125628
MC 1286

Aalami Madani Markaz, Faizan-e-Madinah, Mahallah Saudagaran
Purani Sabzi Mandi, Bab-ul-Madinah, Karachi, Pakistan
UAN: +92 21 111 25 26 92 | Ext: 7213
Web: www.dawateislami.net | E-mail: translation@dawateislami.net